



Cabot's core values are:
Partnership Inclusion Excellence



Cabot Primary School

Learn together, respect each other, achieve forever

www.cabot.bristol.sch.uk

Talaada 21^{da} Maars 2023

Gacaliyaaal Waalidiin,

Aad ayaad ugu mahadsan tihii taageeradiinna ku aaddan maalintii barafka iyo mudaaharaadka. Waxaan rajeynayaa in jawai wanaagsan uu dhawaan imaan doono!

Sidoo kale mahadsanidiin caawintiinna Xafladda Maalinta Buugaagta Adduunka – carruurta oo dhan aad ayey ugu qurux badnaayeen in ay u lebistaan qofka-sheekada dugsiga dhexdiisana ay la wadaagaan akhrinta waqtigii sheekooyinka jiiifka.

Waxaan dhawreynaa inaan kugu aragno dugsiga dhawaan marka la qabanaayo la-tashiyada waalidka/daryeelayaasha. Aad ayey muhiim noogu tahay inaan si shuraako ah u wada-shaqeyno si waxa ugu wanaagsan uu canuggaada u helo.

Dadka u dabbaaldegaaya xilliga Deyrta ama Ramadaanka, waxaan rajeyneynaa in tan kuu noqoto waqti cibaado khaas ah, tirinta maalmaha ka harayna ay si wanaagsan kugu dhaafaan.

Ugu dambeyn, hambalyo weyn ayaan leennahay Elodie, taasoo muujisay geesinimo weyn iyo tixgelin ay dadka kale u haayso iyadoo timaheeda iskiga goysay fasallada oo dhan hortooda si ay u caawiso canug aan timo lahayn uu isticmaalo iyo lacag u ururinta hey'adda tabarucaaddaas qaabilsan, The Princess Trust. Waxaa jira sanduuq taburracaad oo yaalla dugsiga hortiisa, haddii aad jeclaan lahayd inaad xoogaa jajab ah aad ku riddo.



Mahadsanidiin,

Mrs L-H

Taariikhaha Xusuus-Qorka

- 21^{da} iyo 2^{ka} Maars – La-Tashiyada Waalidka/Daryeelaha
- 30^{ka} Maars Diskooga Dugsiga
- 3^{da} – 14^{ta} Abriil 2 usbuuc oo fasax ah, dugsiga waxaa lagu soo noqonaayaa 17^{ka} Abriil
- 24^{ta} Abriil Qadada Ciidda.

Qadada Ramadaanka iyo Ciidda

Waxaan ognahay in tan ay tahay waqti cibaado oo muhiim u ah carruur badan, carruurta qaarna ay doonaayaan in ay soomaan. Waxaan ku faraxsannahay in carruurta Fasalka 6 ay soomaan waqtiga bisha Ramadaan haddii aan oggolaansho ka helno waalidka. Carruurta soomeysa waqtiga fasaxa subaxii bannaanka ayey u bixi doonaan laakiin waqtiga qadada ma tagaayaan bannaanka oo waxay tegi doonaan qol deggan iyadoo madadaalo deggen sameynaaya. Tan waxay carruurta siineysaa fursad ay uga fekeraan sababaha loo soomo iyo in ay keysadaan tamartooda. Waxaa dugsiga oolli doono rooti la is-marsado haddii loo baahdo oo carruurta dareemaan in ay wadi karin soonka maalintaas. Aad ayaad ugu mahadsan tahay taageeradaada arrintaan ku aaddan.

Maalinta Isniinta 24^{ta} Abriil, waxaan sameyn doonnaa qadada Ciidda sida aan u sameyno Qadada Kiristimaska oo kale. Waxaan hadda kula jirnaa wada-xaajood ku saabsan nooca raashinka kooxda kushiinka waxaa kaloo aan dhawreynaa inaan qurxinno hoolka iyo in lagu raaxeysto raashinka si wadajir ah.



Badbaadada Internetka

Badbaadada Internetka waa qeyb muhiim ah dunida aan hadda ku noolnahay.

Fadlan mar walba xasuusi carruurta muhiimadda ah in aan la bixinin akhbaar shakhsiyadeed waqtiga internetka la isticmaalaayo ama lagula hadlaayo dad aan la aqoonin.

Haddii aad walaac qabtid ama su'aalo, fadlan la hadal macallinka canuggaada.



Waxaan jeclaan lahayn inaan warsidahaan ku soo saarno luqadaha bulshadeenna – haddii aad naga caawini kartid inaad ku tarjumbo warsidahaan luqaddaada hooyo, fadlan ogeysii Mudane Rea ee xafiiska. Waxaad naga soo wici kartaa 01173772630

Cabot's core values are:

Partnership **Inclusion** **Excellence**